# Dhexdhexaadintu Waa Shaqaysaa (Mediation Works)

"Dhexdhexaadintu waxay kuu badbaadisaa wakhti iyo lacag waxayna kuu ogolaataa in aad si firfircoon uga qayb qaadato xalinta dhibaato aad qabto."

-Garsoore Stanoch

"Waa hab fiican oo wax lagaga qabto wixii la isku hayo iyadoo ay kula tahay in aad arrinta adigu hogaaminayso."

-Dacwad ka qayb qaate

"Waxay ku siisaa fursad aad arrimaha kaga xaajooto jawi aan culays badani ku saarayn."

- Dacwad ka qayb qaate

"Fekrad qaali ah iyo wadda fiican oo aad kaga nabad gasho kharaj dheeraad ah iyo muran & qaylo."

-Dacwad ka qayb qaate

"Si aad u fiican bay kaaga caawinaysaa in si nadaam ah lagu xalliyo is-afgaranwaaga."

-Dacwad ka qayb qaate




Fourth Judicial District
Hennepin County Conciliation Court
Room 306 Minneapolis City Hall
350 South 5th Street
Minneapolis, Minnesota 55415-0926
612-348-2713
Booqo boggayaga shabakadda:
http://www.courts.state.mn.us/districts/fourth


6/16/05 HC2908

*Tixgeli*

# DEXDHEXAADIN

***Inta aadan dacwada ka diiwaan gelin Maxkamadda dhexdhexaadinta ee Hennepin County***



## Degaabka afraad ee Maxkamadda Degmada

**Maxkamadda dhexdhexaadina ee degaanka afraad ee degmada Hennepin Waxay kugu dhiirigelinaysaa in aad adeegsato Dhexdhexaadin si aad heshiis uga gaartaan is-af-garanwaagiina.**

## Faahfaahinta Dhexdhexaadinta

Marka wax la dhexdhexaadinaayo waxaad la kulmaysaa dhinaca kale (cidda aad is-haysaan) iyo dhexdhexaadiye. Ujeedada kulanku waa in la isku dayo in heshiis aad gaartaan adiga iyo dhinaca kale ee is-afgaranwaagu idinka dhexeeyo. Dhexdhexaadiyuhu ma aha garsoore go'aanna ka gaari maayo dacwadiina, laakiin wuxuu ku caawinayaa dhinacyada is haya sidii ay xal u gaari lahaayeen.

Waxaad la xiriiri kartaa labada barnaamij ee qoran midkood ama qof kale oo wax dhexdhexaadiya ee aad adinku doorateen.

**Faa'idooyinka Dhexdhexaadintu waa:**

Xalka oo si siman looga qayb qaato

Kharaj yar ama kharaj la'aan

Degdeg oo dacwadu u dhamaato

Dhexdexaadi maalmihii, maqribkii ama Sabti iyo Axad/shaqo ka baaqan meysid

Kulanka waxaa lagu qabannayaa xaafaddaada

Walaac iyo wareer yari

Aan ahayn wax sharciyaysan

**Tusaaleyaal is-afgaranwaa oo adeegsan karo dhexdhexaadinta waa:**

Ganacsi

Heshiisyo/kunturaado

Dayn bixiyayaal iyo dayn qaatayaal

Khasaare gaaray hanti

Looshaqeeya/Shaqaale

Kireeye/Kirayste

## BARNAAMIJYADA

### BARNAAMIJKA DHEXDHEXAADINTA MINNEAPOLIS

Wuxuu u adeegaa Minneapolis iyo St. Anthony

Lambarka talefoonka: 612-822-9883

Saacadaha:
Isniin-jimce 9:00 subaxnimo - 5:00 galabnimo

### BARNAAMIJKA DHEXDHEXAADINTA WOQOOYIGA HENNEPIN

Wuxuu u adeegaa Woqooyi iyo Woqooyi-galbeed ee Hennepin County

Lambarka talefoonka: 763-561-0033

Saacadaha:
Isniin-jimce 8:30 subaxnimo - 4:30 galabnimo